INSPEKTIONEN FÖR SOCIALFÖRSÄKRINGEN

2020-03-05

Macluumaad ku socda ka qeybgalayaasha qiimeynta ururrada isku duwidda

Hey'adda baarista ceymiska bulshadu (ISF) waa waax maamul oo ka shaqeysa in ay baaritaan ku sameyso, soona saarto cilmi ku aaddan qeybaha kala duduwan ee ceymiska bulshada. Ulajeeddadu waa in la hagaajiyo wax ku oolnimada iyo dhawrista sharciga ee qofka shakhsiga ah iyo bulshada. Sababtaas awgeed waxay dowladdu ISF u xilsaartay in ay qiimeyso taageerada ay ururrada isku duwiddu maalgeliyaan.

Waa qiimeyntan midda aan jecelnahay in aad ka qeyb qaadatid!

Qiimeyntu waa muhiim maxaa yeelay waxay keeni kartaa cilmi caawin kara in la dhiso qorshe hagaajinaya taageerada qofka shakhsiga ah ee dhinacyo badan uga baahan taageerooyin isku duduwan. Qiimeyntu waxay sidoo kale ka dhigantahay in qofka shakhsiga ah ee taageerada iyo caawimaadda ka helaya ururka isku duwiddu uu codkiisa gaarsiin karyo waaxaha maamulka ee ka shaqeeya taageerada qofka shakhsiga ah.

Fiiro gaar ah u a lahaw in ka qeyb qaadashadaada qiimeyntu ay tahay mid aan khasab ahayn. Haddii aad iska diiddid in aad ka qeyb qaadatid, taasi saameyn kuma yeelaneyso fursadahaaga ku aaddan in aad heshid taageero iyo caawimaad.

Maxay adiga kaaga dhigantahay in aad qiimeynta ka qeyb qaadatid?

1. **Iyadoo qoray tuur la sameynayo ayaad ama *safka ka hor mari doontaa oo aad toos taageero u heli doontaa* (60 %) *ama 6 bilood sugi doontaa* (40 %). Taasi waxaa ay ka dhigantahay in haddii maanta saf loogu jiro hawsha aad ka qeyb qaadaneysid ay markaa jirto fursad ah in aad safka ka hor martid haddii aad dooratid in aad qiimeynta ka qeyb qaadatid. Haddii safku uu 6 bilood ka gaabanyahay, aadna ku dhacdid kooxda ay tahay in sugto, waqti dheer ayaad taageerada iyo caawimaadda sugi doontaa haddii aad qiimeynta ka qeyb qaadaneysid, inta uu dherer ahaan waqtigu noqonayo waxaa ay ku xirnatahay inta uu safka dhererkiisu yahay. Haddii safku uu ka dheeryahay 6 bilood, aadna dooratid in aad qiimeynta ka qeyb qaadatid, markaa safka waad ka hor mari kartaa iyadoo aan la eegeyn in aad taageero toos u heleysid ama ay tahay in aad 6 bilood sugtid.**

2. **Waxaad ka jawaabeysaa *2-3 ra'yi baaris.***

3. ***Macluumaadkaaga shakhsiga ah oo la aqoonsi tiray* ayaa lagu soo bandhigi doonaa, laguna lafa guri doonaa qiimeynta. Natiijada *kama* muuqaneyso qofka aad tihid.**

ISF2008, v1.3, 2015-11-19

INSPEKTIONEN FÖR SOCIALFÖRSÄKRINGEN

Si aad u heshid faahfaahin dheeraad ah oo qodob kasta la xiriirta, eeg lifaaqa macluumaadka ee la socda.

Lifaaqa macluumaadka

Si la taaban karo ahaan maxay ka qeyb qaadashadeydo ka dhigantahay?

1. Ka qeyb qaadashadaadu waxay ka dhigantahay in aad degdeg ama gadaal dambe taageero uga heli doontid Ururka isku duwidda marka la barbar dhigo in aadan ka qeyb qaadan

Qiimeynta waxaad iyadoo qoray tuur la kaashanayo ku dhici doontaa mid ka mid ah laba kooxood: ama koox toos taageero u heleysa (60%) ama koox isla taageerada heli doona 6 bilood ka bacdi (40%). Labada kooxoodba waxay helayaan taageero isku mid ah, laakin waqtiyo kala duwan ah.

Iyadoo qoray tuur la adeegsanayo ayaa la go'aaminayaa waqtiga aad taageerada iyo caawimaadda ka heli doontid Ururka isku duwidda, waxaadna caawimaad heleysaa ka hor ama 6 bilood ka dib marka la barbar haddii aad qiimeynta ka qeyb qaadan lahayd. Goorta aad heleysid taageero iyo caawimaad waxaa si sax ah u goynaya waqtiga sugitaanka ee markaas taagan ee ku aaddan waxa adiga laguugu casuumay. Haddii tusaale ahaan uu waqtiga sugitaanku yahay laba bilood waxay taasi ka dhigantahay in adigaaga uu qoraygu kuugu dhacyay kooxda hore (60 %) aad safkaas iga aha ka hor mari kareysid. Haddii taas beddelkeeda uu qoray tuurku kuugu dhacyo koxda labaad (40 %) waxaad sugi doontaa 4 bilood in badan kuwa aan qiimeynta ka qeyb qaadaneyn.

Waa muhiim in la xasuusto in waqtiga sugitaanka aad ka qeyb qaadan kartid hawlaha kale ee ka ag socda waaxda maamulka ee kuu dirtay Ururrada isku duwidda.

2. Ka qeyb qaadashaadu waxay ka dhigantahay in aad ka jawaabeysid foomam ra'yi baaris uu u dhexeeya 2-3 foom

Iyadoo la kaashanayo ra'yi baarista ayaan dooneynaa in aan cabbirno sida aad caafimaad ahaan tihid, sida aad u aragtid taageerada iyo caawimaadda aad heshid, jawigaaga bulshanimo, sida aad u aragtid fursadahaaga ku aaddan suuqa shaqada.

Foomamka ra'yi baarista waxaa loo dirayaa ciwnaankaaga guriga, cinwaankaaga e-mailka amaba taleefankaaga gacanta. Labadan jeer ee gadaal laga xusay waxaad ra'yi baarista uga soo jawaabeysaa khadka isku xiraha. Ra'yi baaristu waxaa ay ka koobantahay 7-8 su'aalood, in laga jawaabana waxay qiyaas ahaan qaadaneysaa 5 daqiiqo.

- Haddii uu qoray kuugu dhacyo kooxda koowaad (taageero toos ah) waxaad ka jawaabi doontaa 2 foom oo ra'yi baaris oo gaagaaban. Foomka ra'yi baarista ee koowaad waxaad heli doontaa usbuuc gudihiis ka dib xiriirka ugu horreeya ee Ururka isku duwidda, foomka ra'yi baarista ee labaadna 6 bilood ka bacdi.

INSPEKTIONEN FÖR SOCIALFÖRSÄKRINGEN

- Haddii uu qoray kuugu dhacyo kooxda labaad (taageero 6 bilood ka dib) waxaad ka jawaabi doontaa 3 foom oo ra'yi baaris oo gaagaaban. Foomka ra'yi baarista ee koowaad waxaad heli doontaa usbuuc gudihiis ka dib marka aad ogaatid in aad kooxdan ka tirsantihid. Foomka ra'yi baarista ee labaad waxaad heleysaa marka aad taageeradaada ka ag billawdid ururka isku duwidda, foomka ra'yi baarista ee seddaxaadna 6 bilood ka bacdi.

3. Ka qeyb qaadashadaadu waxay ka dhigantahay in ISF ay lafa gureyso macluumaadka shakhsiga ah ee qiimeynta oo la aqoonsi tiray (oo loo soo bandhigayo heer koox ahaaneed)

Si aanan u weydiin in ka badan inta lagama maarmaanka ah waxaa jawaabahaaga ra'yi baarista lagu dhameystirayaa macluumaadka horbaba ku jira diiwaannada Xafiiska Shaqada, Qasnadda Ceymiska, Guddiga arrimaha Bulshada (Diiwaanka Dawooyinka, Diiwaanka Bukaanada, Diiwaanka dadka qaata Kaalmada Dhaqaalaha) iyo Xafiiska Dhexe ee Tirakoobka. Waa macluumaadka ceymiska bulshada, macluumaadka dakhliga, dawooyinka qofka loo qoray, daryeelka bukaanka, macluumaadka shaqooyinka, jinsiga, da'da, waxbarashada, xaaladda qoysnimada, carruur, soo galooti, waddanka uu qofku ku dhashay iyo muwaadinnimada. Macluumaadkaas waxaa kama dambeys ahaan dib u cusbooneysiin lagu sameynayaa ilaa iyo sanadka 2024.

Macluumaadka shakhsiga ah ee loo gudbinayo ISF waa la aqoonsi tiri doonaa. Waxay taasi ka dhigantahay in macluumaadkaaga aan laguugu garan kareyn. Annaga waxaad noo ahaaneysaa qof aan la aqoonsan karin. Sidoo kale marka natiijada qiimeynta la soo bandhigayo kama muuqaneyso waxa aad adi ahaan ku jawaabtay.

ISF waxay qiimeynta si wada jir ah jawaabahaaga su'aalaha ra'yi baarista ula lafa guri doontaa macluumaadka shakhsiga ah ee la aqoonsi tiray ee ka kala yimid diiwaannada waaxaha maamulka.

Ilaalinta macluumaadka la gudbiyay

Cid aan ehel u ahayn wax kama heli kareyso jawaabahaaga ama macluumaadkaaga. Jawaabahaaga iyo macluumaadkaaga waxaa lagu xafidi doonaa kumbuyuutar ku xiran nambarro sir ah oo maskaxdiisu u furantahay oo keliya kuwa mas'uulka ka ah qiimeynta. Ammaanka la xiriira maareynta macluumaadkaagu aad buu u sarreeyaa, si xoog leh ayuuna uga ilaalinayaa in ay gasho cid aan ehel u ahayn. Waxaa intaas dheer in ay khasab tahay in oggolaasho laga heysto Waaxda maamulka ee eegitaanka anshaxa si loo maareeyo macluumaadka (Nambarka tixraaca 2019-02440).

Xeerarka ku aaddan maareynta macluumaadka shakhsiga ahi waxay ku jiraan shuruucda iyo xeerarka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub (2018:218) oo ay la socdaan xeerar dhameystir ah oo ku aaddan qaraarka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub. Xeerar ku aaddan qarsoodida ee la xiriirta tirakoobka iyo gudbinta waxyaabaha sirta ah waxay ku jiraan fasalka 24. § 8, iyo fasalka 11. § 1 xeerka sirta iyo bannaanyaalnimada (2009:400) iyo § 7 ee qaraarka sirta- iyo bannaanyaalnimada (2009:641). Dadka ku hawlan qiimeynta waxaa taabanaya xeerarka dukumiinti qarinta iyo waajibka wax la aamusidda.

INSPEKTIONEN FÖR SOCIALFÖRSÄKRINGEN

Macluumaad ku aaddan macluumaadka shakhsiga ah

ISF ayaa mas'uul ka ah macluumaadka shakhsiga ah ee maareynta macluumaadka shakhsiga ah ee ay fulinayaan. Xafiiska Shaqada, Qasnadda Ceymiska, Guddiga Arrimaha Bulshada, Xafiiska Dhexe ee Tirakoobka ayaa mas'uul ka ah maareynta macluumaadka shakhsiga ah ee ay waax walba oo maamul ay gaar u fulineyso.

Maareynta macluumaadka shakhsiga ah waxay u dhaceysaa sida soo socota: marka laguu soo gudbiyo Ururrada isku duwidda waxay sameyn doontaa dukumiinti ka kooban macluumaadka soo socda si loo qiimeeyo: nambarrada aqoonsiga, nambar taxane ah oo loogu tala galay qiimeynta, cinwaan e-mail, nambar taleefan oo gacanta ah, in aad oggolaatay ka qeyb qaadashada qiimeynta iyo in kale, taariikhda soo gudbinta iyo oggolaashada. Macluumaadka dukumiintigan waxaa isagoo la maldahay loo diri doonaa ISF oo isaga isticmaaleysa si ay foomamka ra'yi baarista kuugu soo dirto. Macluumaadka waxaa loo isticmaalayaa si loo dhameystiro foomka ra'yi baarista ee ay ku qoranyihiin macluumaadka diiwaanka waaxaha maamulka ee kor ku xusan (kor ka fiiri qodobka 3). Jawaabaha ra'yi baarista waxaa iyagoo kood ku xiran loo gudbinayaa waaxaha maamulka si aysan u suurta gelin in laga akhrisan karo wixi aad adigu ra'yi baarista uga jawaabtay. Walxaha ugu dambeeya ee macluumaadka ee ay ISF heleyso iyadoo ay la socdaan jawaabihi ra'yi baarista iyo macluumaadka diiwaannada waa la aqoonsi tirayaa.

Macluumaadka dukumiintiga ku jira iyo macluumaadka shakhsiga ah ee la aqoonsiga tiray ee diiwaannada ka yimid waxaa muddo toban sanadood ah, ka dib marka ay diraasaddu dhammaato, lagu aarkiifgareynayaa (maskax nambarro sir ah ku xiran) oo ag yaalla ISF. Hadafka ugu dambeeya ee laga leeyahay maareynta macluumaadku waa in ISF ay u suurta gasho in ay sameyso qiimeynta kor lagu qeexay. Aasaaska sharciga ee maareynta macluumaadka ee ISF waa in ay lagama maarmaan tahay si loo fuliyo hawl bulshada guud ahaan dan u ah, si waafaqsan hawsha ISF, iyo hadaf cilmi baariseed. Aasaaska sharcigu wuxuu ku cadyahay qodobka 6.1 e iyo qodobka 9.2 j ee qaraarka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub.

Sanadiiba hal mar ayaad xaq u leedahay in aad si lacag la'aan ah warbixin uga heshid macluumaadkaaga shakhsiga ah ee ISF ay maareyneyso. Taasi waxay khuseysaa oo keliya jawaabaha ra'yi baarista maxaa yeelay macluumaadka diiwaannada waa la aqoonsi tiray. Sidaas darteen ma soconeyso in la aqoonsado cidda ay macluumaadku khuseeyaan. Xaq baad u leedahay in aad dalbatid in la saxo ama la tirtiro jawaabaha ra'yi baarista. Waxaad xaq u sii leedahay in aad ka soo hor jeesatid maareynta macluumaadka ama aad dalbatid in ISF ay xididdo maareynteeda. Waxaad ugu dambeyntii xaq u leedahay in aad fursad u heshid in macluumaadka laguugu soo diro warbaahin elekteroonig ah oo keeneysa in aad u wareejin kartid (kumbuyuutar la qaadid karo). Haddii aad u aragtid in macluumaadka shakhsiga ah loo maareynayo si khilaafsan xeerka iminka taagan waxaad fursad u leedahay in aad dacwad u gudbisid waaxda maamulka ee kormeerka (Kormeerka macluumaadka).

Barta intarneetka ee ISF (www.inspsf.se) waxaa ku jira macluumaad ku aaddan maareynta macluumaadka ee ISF iyo xuquuqdaada. Haddii aad dooneysid macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan maareynta macluumaadka waxaad la xiriiri kartaa wakiilka ilaalinta macluumaadka ee ISF (dataskyddsombud@inspsf.se).

INSPEKTIONEN FÖR SOCIALFÖRSÄKRINGEN

Haddii aad rabtid macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan qiimeynta ama arrimo kale ku soo dhawaw in aad la soo xiriirtid cid annaga naga mid ah oo ka shaqeeysa qiimeynta.

_____
Ann-Christin Jans (Hoggaanka mashruuca qiimeynta iyo cilmi baarista)
Tel: 010-174 15 08, Ann-Christin.Jans@inspsf.se

_____
Jenny Säve-Söderbergh (cilmi baare)
jenny.save-soderbergh@inspsf.se
Tel: 010-174 15 18